Portland Public Schools
501 N Dixon Street
Portland, OR 97227

**Ogeysiinta Qoraalka ah ee ku aadan Waalidka**
**Isticmaalka La soo jeediyay ee Caymiska Dadweynaha (Medicaid) ee Dugsiga**
**Degmada/Barnaamijka ECSE**
**Da'aha 3 - 21**

Dugsiyada degmada iyo barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurnimada Hore (ECSE) ayay dhici kartaa in ay qayb ahaan lacag magdhow ah ka helaan Hay'ada Medicaid ee Gobolka Oregon, Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA), oo loogu talagalay kharashyada adeegyada caafimaadka ee Medicaid daboosho ee la siiyo carruurta naafada ah ee ka diiwaan gashan Medicaid.   Si loo helo lacagta magdhowga ah ee Medicaid, dugsiga degmada ee ilmahaaga ama barnaamijka ECSE wuxuu u baahan yahay oggolaanshahaaga, oo sidoo kale loo yaqaano oggolaansho si macluumaad ku saabsan ilmahaaga loola wadaago OHA. Nooca macluumaad ee soo socda ee ku saabsan ilmahaaga waxaa dhici karta in loo baahdo in lala wadaago OHA: magaca ilmaha; tariikhda dhalasho; nooca adeegyada la bixiyay, taariikhda(akha) adeegyada la bixiyay, iyo cidda bixisay; diiwaannada ka qayb qaadashada, iyo Lambarka Aqoonsiga Ardayga ee Gobolka (SSID).

Ogeysiintani waxay sharraxaysaa ilaalinta la xiriirta bixinta oggolaansho ee isticmaalka caymiskaaga dadweyne (Medicaid). Dugsiga degmada/barnaamijka ECSE ayaa kaliya codsan doona oggolaanshahaaga qoraalka ah ee la isku wargeliyay marka u horreysa ee uu codsado helitaanka caymiskaaga dadweyne (Medicaid), ka hor inta aan la helin oggolaanshahaaga.  Ka dib taasi waxaad ogeysiin qoraal ah u heli doontaa si sanadle ah.

Ogeysiintani qoraalka ah waxaa loola jeedaa in ay kugu wargeliso in aad leedahay xuquuq iyo ilaalinta qaarkood:

1. Dugsiga degmadu kaagama baahnaan karo in aad isku diiwaan geliso Qorshaha Caafimaadka Oregon (Medicaid) si ilmahaagu u helo adeegyada caafimaadka ee dugsiga kuwaasi oo ilmahaagu xaq u leeyahay.
2. Dugsiga degmada kaama codsan karo in aad bixiso lacagta wax kasta oo loogu talagalay adeegyada la xiriira caafimaadka ee ilmahaaga ee lagu bixiyo goobta dugsiga.   Tani waxay ka dhigan tahay in aysan kaa codsan karin copay-ga iyo lacagta la iska jaro si biil loogu soo dalaco OHA loogu talagalay adeegyada la bixiyo.
3. Haddii aad dugsiga degmada siiso oggolaansho macluumaad lagula wadaagayo OHA si biil loogu soo dalaco Medicaid:
    a. Tani ma saameyn doonto caymiska nolosha ee ilmahaagu heli karo ama faa'iidada kale ee Medicaid; ama sinaba uma xaddidi doonto isticmaalka qoyskaaga ee faa'iidooyinka Medicaid ee ka baxsan dugsiga.
    b. Oggolaanshahaagu ma saameyn doono adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga ama Barnaamijka Waxbarashada Shaqsi ahaaneed (IEP) ama xuquuqda Section 504 si uun, haddii uu ilmahaagu u qalmo in uu helo iyaga.

c. Oggolaanshahaagu ma horseedi doono wax isbeddelo ah oo ku yimaada xuquuqda Medicaid ee ilmahaaga.

d. Oggolaanshahaagu ma horseedi doono wax halis oo ah luminta u qalmida Medicaid kale ama barnaamijyada OHA maalgeliso.

4. Haddii aad bixiso oggolaansho, waxaad xaq u leedahay in aad beddesho maskaxdaada oo aad oggolaanshahaaga la noqoto wakhti kasta. Waa in aad dugsiga degmada kula socodsiisaa ***qoraal ahaan*** in oggolaanshahaagii lala noqday.

5. Haddii aad ka noqoto oggolaanshahaaga ama aad diido in aad u oggolaato dugsiga degmada in uu diiwaannada ilmahaaga la wadaago OHA ee ujeedada raadinta lacagta magdhowga ah ee Medicaid ee loogu talagalay kharashka adeegyada caafimaadka ee la daboolo, dugsiga degmadu wuxuu sii wadi doonaa in uu mas'uul ka noqdo siinta ilmahaaga ee adeegyada caafimaad, oo aan wax lacag ahi kaaga baxayn.